



## **Basaska Korontada Ku Shaqeynaya ee Dugsiyada Dadweynaha Portland (Greenlights Electric Buses)**

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay u dabaaldegayaan Maalinta Dunida ee 2023 taasi munaasabadani ay la socota in lagu soo kordhiyey saddex bas oo ku shaqeynaya korontada una saaxiib ah cimilada, iyada ayna hawada aan neefsano ay wasakheyneyn: saddexdan bas ee ku shaqeynaya korontada waxaa laga soo iibsaday Shirkada GreenPower Motor.

Dugsiyada degmadu waxay dadweynaha u soo bandhigeen basaska cusub bishii Abriil 5teedii. Basaskani waxay leeyihiin 24 kursi oo qaadi kara 24 arday, sidoo kalena basasku waxay socon karaan masaafo dhan 150 mayl, waxay muujineysaa siday dhab ahaan Dugsiyada Dadweynaha Portland uga go'an tahay ilaalinta deegaanka iyo inay isticmaalaan jiilashada ardayda mustaqbalka gaadiid muddo dheer jiraya, sidaas waxaa yiri Kaaliyaha Agaasiimaha Addeegyada Gaadiidka Brandon Coonrod.

“Waxaan isku dayeynaa inaan isbedel ka sameyno meeshii aan karnaba, anakoo ugu talogalnay in caruurteena raacaan baabuurta ugu nabadgelyo badan ee suurtagal ah,” ayuu yiri. “Waxaan mar walba aan maskaxda ku haynay nabadgelyada, laakiin hadda waxaan xaqiiqdii wax ka qaban karnaa arrimaha ku saabsan sidii wax looga qaban lahaa dhinaca qiiqa.”

Saddexda bas ee ku shaqeynaya korontada ee lagu soo kordhiyey waxay ka dhigan tahay qeyb yar oo ah qorshaha waqtiga fog ee dugsiyada degmada ay ku ilaalinayaa deegaankeena. Bishii Maarso 2022, golaha waxbarashada dugsiyada degmadu waxay si wada jir ah u ansixiyeen guud ahaan siyaasada dhibaataada cimilada oo looga baahan doono PPS inay hoos u dhigto qiiqa qiyaastii 50% marka la gaaro 2030 iyo in la gaaro heer qiiqa meesha laga saaro marka la gaaro sanadka 2040.

“Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay hadda dejiyeen jiho cad oo lagu aqoonsanayo mas'uuliyadeena inaga saaran sidii aan wax uga qaban lahayn caddaalada cimilada,” Guerrero ayaa yiri wax ka yar ka dib markii la ansixiyey habraacani wax lagaga qabanayo cimilada. “Bilowgii ardaydeena waxaa la siiyey kaalinta koowaad ee hoggaaminta ee dadaaladani iyaga oo horseed ka ahaa inay ku adkeystaan inaguna aan ku adkeysanay labadaba himilooyinkeenii iyo tallaabooyinka la qaaday inay si fiican u shaqeyn doonaan in la fuliyo lagana midho dhaliyo.”

Hadafka ah in la gaaro heer qiiqa meesha laga saaro waa himilo aan la dafiri karin, laakiin degmadu waxay wax uga qabanaysaa arrintan tallaabo tallaabo, iyada oo la bilaabayo naqshadii iyo dhismihii

dugsiyo cusub oo karboon yar iyo dib u cusbooneysiinta dugsiyadii hore u jiray inay noqdaan kuwa tamarta si fiican u isticmaalaya, adkeysii leh, iyo kuwa la qabsan kara cimilada.

PPS, sidoo kale waxay ballan qaadaysaa inay joojinayaan kaabayaasha cusub iyo kuwii hadda jira ee isticmaalaya shidaalka, habeynta qaabka qashinka looga hortago, in la kordhiyo geedaha hadhka leh iyo goobo cagaaran, la dhiirgaliyo mashaariic dib loogu soo celiyo goobihii daamurka lagu shubay sidoodii hore lagu soo celiyo, iyo inay ardayda iyo shaqaaluhu gaadiidka shidaalka ku shaqeeya yareeyaan iyaga lagu dhiirgalinayo inay isticmaalaan in qof kastaa soo lugooyo, isticmaalaan baaskiilad, ama guryaha ka soo shaqeeyaan.

Iyada oo ay qeyb ka tahay siyaasada, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay sidoo kale ogolaadeen in lala socdo isla markaana laga hadlo saameynta caafimaad ee ku salaysan cimilada, nabadgelyada iyo faydada qaabka ardayda iyo shaqaalaha iyo sidii loo siin lahaa waxbarashada deegaanka oo waxtar leh.

Coonrod wuxuu yiri, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay go'aansadeen inay qeyb ka noqdaan waqtigii ugu haboonaa suuqa basaska ku shaqeeya korontada. Gaadiidka waqtigan waa kuwo aad la iskugu haleyn karayoo, si dhib yar loo dayactiri karo, iyo iyaga oo noocdayadani cusub ay ka wanaagsan yihiin kuwii hore. Haddaba saddexda bas ee PPS soo iibsatay waa kuwo lagu sameeyey wadankeena Maraykan kuwaasi oo halkii galaanba ay ku socon karaa masaafo dhan 48 mayl.

“Waxaan ku bixinay waqti aad u fara badan baaritaanka ku saabsan dhinac kasta marka laga eego basaskan kala duwan ee ku shaqeeya korontada iyo shirkadaha soo saara,” ayuu yiri. “Ugu dambeyntii, waxaan ka soo iibsanay shirka GreenPower, sababtoo ah waa shirkad taariikheedeeda wax soo saar ee basaska aad la iskugu raacay in la isku haleyn karo, gaadiid u qalma jidka. Inkastoo haddii aynu nahay Dugsiyada Dadweynaha Portland aynaan ahayn dugsiyada degmada dadweynaha ee ugu horeeyey inay maalgashadaan gaadiidkani, waxaan dareemeynaa inaynu hawshani qabanay waqtigii ku haboonaa. Marka aad isticmaaleyso cashuurta dadka, waa inaad hubisaa si caqliga u saaxiib ah inaad ugu shaqeyso oo aad xil adag iska saartaa.”